

### CMAS (Talaabooyinka Guusha Waxbarashada Colorado)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



### MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

Imtaxaanada Colorado ee Guusha Aqoonta, ama CMAS, waa imtaxaan kooban oo heer gobal ah oo lagu tijaabinaayo fanka luuqada, xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada. CMAS wuxuu lasocdaa heerarka Waxbarashada: ee gobalka waxaana loogu talagalay in lagu cabiro sida ugu fiican ee ardaydu kubuuxinayaan heerarka ayna diyaar ugu yihiin fasalkooda xigga.

Imtaxaanada CMAS waxaa lagu abuuray wada shaqayn dhexmartay Waaxda Waxbarashada Colorado, qandaraaslaha imtaxaanka Pearson, iyo macalimiinta Colorado.



### XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

#### Ardayda dugsiga Hoose iyo Dhexe

Gu' kasta, CMAS waxaa lasiiyaa ardayda dugsiga hoose iyo dhexe ee fasalada iyo maadooyinka soosocda:

- Barashada Luuqada Ingiriiska (Fasalada 3-8).
  - Imtaxaanka Farshaxanka Luuqada Isbaanishka oo qayb ka ah imtaxaanka luuqada Ingiriiska oo laga qaadaayo ardayda la aqoonsado ee fasalada 3aad iyo 4aad ee barta luuqada Ingiriiska.
- Xisaabaadka (Fasalada 3-8)
- Saynis (Fasalka 5 iyo 8)
- Cilmiga Bulshada (Fasalka 4 iyo 7 ee dugsiyo gaar ah)

#### Ardayda Dusiga sare

##### *Ardayda Fasalka 9aad iyo 10aad*

Gu' kasta, ardayda fasalada sagaalaad iyo tobnaad waxay galayaan imtaxaanka PSAT (Imtaxaanka Garaadka Dabiiciga ee Shaqsiyada Ardayga) ee farshaxanada luuqada iyo xisaabta. Majiraan imtaxaanada CMAS ee lagu qaadaayo fasaladaan.

##### *Ardayda Fasalka 11aad*

Gu' kasta, ardayda fasalka koow iyo tobnaad waxay marayaan imtaxaanada soosocda ee gobalka:

- SAT (Imtaxaanka Garaadka Dabiiciga ah) ee farshaxanada luuqada iyo xisaabaadka
- Sayniska CMAS
- Cilmiga Bulshada CMAS

CMAS rasmiyan waa imtaxaan oonleen ah, kaasoo lasameeyo inta lagu jiro bilaha Maarso iyo Abriil. Waydii dugsiiga cunugaaga jadwalka gaarka ah ee imtaxaanka. Taariikhda iyo waqtiyadu way kaladuwan yihiin dugsi kasta.

Imtaxaanada gobalka Colorado waxay ubaahan yihiin celceliska sadex ilaa afar saacadood, taasoo qaadanaysa wax kayar 1.5% ee waqtiga casharka ardayga in lagu dhameeyo. Imtaxaanada kale oo dhan waxaa lagu go'aanshaa heerka dhismaha maxaliga ah.



## WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Cunugaagu wuxuu helayaa Warbixinta Dadaalka ee Ardayga oo muujinaaya heerka dadaalka iyo buundada si loo muujiyo dadaalka guud ee cunugaaga ee imtaxaanka maadada lagu imtaxaanay. Buundooyinka cabirka gaarka ah ayaa lasheegaa si loo muujiyo heerka uu ardaygaagu kagaaray maado kasta.

Celceliska Dugsiga, degmada, iyo gobalka ayaa kujira warbixinta si aad iskugu fiiriso aqoonta ardaygaga iyo aqoonta ardayda kale.



## SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Natijoooyinka CMAS waxay sawir kabaxshaan dadaalka ardayga ee dugsiga, degmooyinka, macalimiinta, waalidiinta, iyo bulshada. Natijoooyinku waxay muujinayaan hormarka ay ardaydu samaynayaan aqoon ahaan, taasoo qayb muhiim ah u ah xaqiijinta in ardaydu marayaan heerkii laga rabay si ay uqalin jabiyaan ayagoo udiyaarsan kuleej iyo xirfad barasho. Ardaydu waxay adeegsadaan natijoooyinka CMAS si kor loogu qaado casharada sifo loobuuxsho baahiyaha shaqsigaa ah ee ardayga. Dugsiyada iyo degmooyinku waxay adeegsadaan natijoooyinka CMAS si ay wax uga badalaan barnaamijyada casharada ee sanadka soosocda.



## WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirgalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

### Wixii macluumaad dheeri ah: CMAS

Booqo:

- <http://www.cde.state.co.us/assessment/generalinfo-parents>
- Imtaxaanada Muraajacada ah: <https://co.testnav.com>

### Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada

Booqo:

- <http://assessments.dpsk12.org>

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.